FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

## لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 14-aad. Garowe November 19, 2012** **Lam.11**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 19. ee 19/11/2012, kuna saabsan Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland.***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr.19 ee November 19, 2012, kuna saabsan Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/111/2012 ee 15/11/2012;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

**Qodobka 1-aad**
Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland.

**Qodobka 2-aad**
Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**
Dhaqangalka Sharcigan wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa Sharcigani dhaqan gelayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**GOLAHA WAKIILADA**

**HOUSE OF REPRESENTATIVES**

***Xafiiska Guddoomiyaha***

***Office of the Speaker***

***Ref:-*** **XGGW/DPL/ 111 /2012** **Garoowe, Khamiis** Date:- **15/11/2012**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland.**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref MW/DPS/ 229/2012 ee October 17, 2012 kuna saabsan Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee 11/11/2012 |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta Xeerka Xabsiyada Dawladda Puntland.

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

**DAWLADDA PUNTLAND**

**EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

---

# Sharciga Xabsiyada

## ee Dawladda Puntland

---

**Garoowe, November 15.2012**

# HOR-U-DHAC

Sharcigani wuxuu adkaynayaa in ujeedadda xornimo-ka-qaadiddu tahay mid ku salaysan badbaadada bulshada, danta dhibbanaha iyo dhaqan-celinta maxaabiista si ay sharaf iyo karaamo ugu dhexnoolaadaan bulshada.

Qodobbada sharcigan waxaa loo dabaqayaa si loo siman yahay.

Waxaa reebban kala soocid ku salaysan: jinsiyad, midab, lab iyo dheddig, luuqad, diin, fikrad siyaasadeed, hanti iyo wax kasta oo keeni kara kala soocid marka la dabaqayo sharcigan.

Sharcigaan marka lagu dabaqayo maxaabiista waa in mabaadida aasaasiga ah ee soo socota la raaco:

1. Dhammaan maxaabiista xornimadooda laga qaaday waxaa loola dhaqmayaa si xushmad leh waafaqsanna mabaadi'da guud ee xuquuqul insaanka.
2. Dadka xornimadooda si sharci ah looga qaaday waxay lahaanayaan dhammaan xuquuqda aan xukun ama amar sharci ah looga qaadin.
3. Xaddidaadda la saaro dadka xornimadoodii laga qaaday waa in ay ahaato mid ku dheelitiran oo munaasib ku ah sharciga.
4. Xaaladaha xabsiga ee xadgudubka ku ah xuquuqul insaanka cudurdaar loogama dhigi karo dhaqaale la'aan.
5. Nolosha xabsigu waa inay u dhigantaa heerka nolosha bulshada caadiga ah.
6. Dhammaan wixii xarig fudud ah waa in la maareeyo si loo fududeeyo maxaabiista xornimada laga qaaday sidii ay ula midoobi lahaayeen bulshada xorta ah.
7. Waa in la dhiirigeliyo iskaashiga lala leeyahay hay'adaha adeegyada bulshada iyo in sida ugu wanaagsan bulshada rayidka ah ay ugu lug yeelato nolosha xabsiyada.
8. Shaqaalaha xabsigu waxay maxaabiista siinayaan adeeg guud oo muhiim u ah noloshooda.
9. Hay'adaha u xilsaaran waxay baaritaan iyo kormeer joogta ah ku samaynaysaa xabsiyada si loola socdo xaaladdooda guud.

**QEYBTA I: TILMAAMO GUUD**...6

Qodobka 1aad Qeexitaan...6

**QEYBTA II: DHISME XABSI**...6

Qodobka 2aad Caddayn xabsi...6

Qodobka 3aad Xabsi kumeel gaar ah...6

QEYBTA III: **MAAMULKA XABSIYADA**...6

Qodobka 4aad Maamulidda Xabsiyada...6

Qodobka 5aad Amarrada Taliyaha ee gaarka ah...6

Qodobka 6aad Magacaabidda Taliyaha Xabsiga--...7

Qodobka 7aad Taliyayaasha xabsiyada...7

Qodobka 8aad Hannaanka xabsiga...8

Qodobka 9aad magacaabidda Saraakiisha Xabsiga...8

Qodobka 10aad Awoodaha iyo Waajibaadka Saraakiisha Xabsiga...8

Qodobka 11aad Gacansiinta ay bixiyaan Saraakiisha Boolisku...-...9

Qodobka 12 magacaabidda Saraakiil aan ahayn Saraakiisha xabsiga.-...9

**QEYBTA IV: U ADEEGIDDA, SOO GUDBINTA IYO SII-DEYNTA MAXAABIISTA**...9

Qodobka 13aad Daryeelka Maxaabiista...9

Qodobka 14aad Qoraalka Caddaynaya waxa qofka loo soo qabtay-...9

Qodobka 15aad Horgeyn Maxkamadeed...9

Qodobka 16aad Siideynta Maxaabiista-----10

Qodobka 17aad Caawinaadda la siinayo Maxaabiista la sii-daayey...10

Qodobka 18aad Dhimidda Muddada Xabsiga--...10

Qodobka 19aad Siidayn Shuruudo ku xiran...11

**QEYBTA V: MAAREYNTA, MAAMULIDDA IYO AMMAANKA**...11

Qodobka 20aad Baaritaanka Maxaabiista...11

Qodobka 21aad Xadayn...12

Qodobka 22aad Meel gaar ah ku hayn....................................................................12
Qodobka 23aad Isticmaalka hubka-..............................................................12
Qodobka 24aad Ku-xadgudubka Ammaanka Xabsiga................................................13
Qodobka 25aad Booqashada Xabsiga..................................................................13
Qodobka 26aad Booqashooyinka Xeer-ilaaliyaha Guud..........................................14
Qodobka 27aad Ciqaab la xiriirta waxyaabo aan la oggolayn...................................14
Qodobka 28aad Ciqaab anshaxeed........................................................................14
Qodobka 29aad Diiwaanka anshaxmarinta.............................................................14

**QEYBTA VI: BOOQASHOOYINKA**..............................................................15

Qodobka 30aad Oggolaanshaha Booqashada............................................................15
Qodobka 31aad Magacaabidda iyo Awoodda Guddiga Kormeerka Xabsiga......15
Qodobka 32aad Iskaashiga hawlwadeennada xabsiga iyo booqdeyaasha.........16
Qodobka 33aad Baaritaannada uu sameeyo Taliyaha Xabsiga..............................16

**QEYBTA VII: SOO BOOQASHADA MAXAABIISTA**.......................................16

Qodobka 34aad Booqashooyinka qaraabada iyo saaxiibada maxbuuska............16
Qodobka 35aad Booqashooyinka qareennada.........................................................17
Qodobka 36aad Booqashada booliska......................................................................17
Qodobka 37aad Diidmada Booqashada.....................................................................17
Qodobka 38aad Booqashooyinka iyo xiriirada........................................................17
Qodobka 39aad Helitaanka qareenka.......................................................................18

**QEYBTA VIII: DARYEELKA MAXAABIISTA**.............................................18

Qodobka 40aad Alaabta maxaabiista.........................................................................18
Qodobka 41aad Raashinka........................................................................................18
Qodobka 42aad Dharka..............................................................................................18
Qodobka 43aad Gogosha...........................................................................................19
Qodobka 44aad Nadaafadda maxbuuska...................................................................19
Qodobka 45aad Jiifka.................................................................................................19

Qodobka 46aad Codsiyada iyo cabashooyinka....................................................19

**QEYBTA IX: WAXBARASHADA, DHAQANCELINTA IYO SHAQADA..............20**

Qodobka 47aad Waxbarashada maxaabiista....................................................20

Qodobka 48aad Barnaamijyada dhaqan-celinta....................................................20

Qodobka 49aad ku dhaqanka diinta....................................................21

Qodobka 50aad Shaqada maxaabiista....................................................21

**QEYBTA X: CAWIMAADA CAAFIMAADKA IYO DAAWEYNTA..............21**

Qodobka 51aad Daryeelka caafimaadka....................................................21

Qodobka 52aad Wajibaadka saraakiisha caafimaadka....................................................22

Qodobka 53aad Awoodda baaritaanka caafimaadka iyo daaweynta..............22

Qodobka 54aad Maxaabiista bukta ama u baahan karantiin..............................22

Qodobka 55aad Maxbuus maskaxdiisu aysan fayoobeyn..............................23

Qodobka 56aad Ogeysiinta hay'adaha sharciga....................................................23

Qodobka 57aad Dhimashada maxbuuska....................................................23

**QEYBTA XI: KALA-SAARIDDA....................................................23**

Qodobka 58aad Guddiga qaabilaadda iyo kala saaridda..............................23

Qodobka 59aad Kala soocidda dabaqadaha kala duwan ee maxaabiista..........24

Qodobka 60aad Maxaabiista dumarka ah iyo carruurtooda..............................24

Qodobka 61aad Dadka aan qaangaarka ahayn....................................................25

**QEYBTA XII: MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN..............................25**

Qodobka 62aad Kormeeridda maxaabiista dilka ku xukuman..............................25

Qodobka 63aad la kulanka maxbuuska dilka ku xukuman..............................26

**QEYBTA XIII: AWOODDA LOO ISTICMAALI KARO MAXAABIISTA..............26**

Qodobka 64aad Adeegsiga Awoodda....................................................26

Qodobka 65aad Isticmaalka awood aan halis ahayn....................................................26

Qodobka 66aad Isticmaalka hubka....................................................27

QEYBTA XIV: ANSHAXMARINTA MAXBUUSKA....27

Qodobka 67aad Tillaabooyinka anshaxmarinta....27

Qodobka 68aad Baaritaanka dembiyada anshaxmarinta....27

Qodobka 69aad ka cabashada go'aanka anshaxmarinta....28

Qodobka 70aad Fal-dembiyeedka.... 28

Qodobka 71aad Dammaanad-qaadka sharci ee saraakiisha xabsiga.... 28

Qodobka72aad Raadinta Maxbuuska Baxsaday....28

Qodobka 73aad Burin ....28

Qodobka 74aad Dhaqangal....28

## QEYBTA I
## TILMAAMO GUUD

### Qodobka 1aad
### Qeexitaan

Haddii aan si kale loola jeedin sharcigaan gudihiisa ereyada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida soo socota:

1) **Dowlad** waxaa weeye Dowladda Puntland
2) **Wasiir** waxaa loola jeedaa wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ee Dowladda Puntland
3) **Xeer Ilaaliye Guud** waxaa loola jeedaa Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dowladda Puntland
4) **Maxkamad** waxaa weeye maxkamad ka mid ah qaab dhismeedka maxkamadaha Dowladda Puntland
5) **Taliye** waxaa weeye Taliyaha Ciidamada Asluubta ee Dowladda Puntland;
6) **Taliye Xabsi** waxaa weeye sarkaal Mas'uul ka ah xabsi ka mid ah xabsiyada Dowladda Puntland
7) **Guddiga Kormeeridda Xabsiga** waxaa loola jeeda guddi uu magacaabay Wasiirku.
8) **Sarkaal Caafimaad** waxaa weeye qof shaqo caafimaad ka haya xabsi;
9) **Maxbuus aan qaangaar ahayn** waxaa loola jeedaa maxbuus ka yar da'da 15 (shan iyo Toban Sano).

## QEYBTA II

## DHISME XABSI

### Qodobka 2aad
### Caddayn xabsi

Wasiirku wuxuu dekreeto ku soo saari karaa dhisme xabsi iyo inay xabsi noqon karto meel kasta oo la habboonaata isagoo raacaya sharciga.

### Qodobka 3aad

### Xabsi ku meel gaar ah

Taliyaha Xabsigu isagoo oggolaansho ka helaya Taliyaha Ciidanka Asluubta wuxuu meel kale u wareejin karaa maxaabiis haddii:

a) Tirada maxaabiiista ku jirta xabsiga ay ka badan tahay intii loogu tala galay;
b) Cudur faafi kara uu ka jiro gudaha xabsiga ama sabab kale darteed ay lagama maarmaan tahay in hoy ku meel gaar ah ama adeeg badbaado leh la siiyo maxaabiista.

# QEYBTA III

## MAAMULKA XABSIYADA

### Qodobka 4aad

### Maamulidda xabsiyada

1) Taliyahu wuxuu la socodsiinayaa wasiirka iyo Xeer Ilaaliyaha Guud:
   a) Baxsashada iyo isku day baxsasho ee maxaabiista;
   b) Geerida, dhaawaca halista ah iyo wax kasta oo aan caadi ahayn oo la xiriira maxaabiista kana hor imaanaya nidaamka iyo ammaanka xabsiga.

2) Taliyuhu wuxuu ugu yaraan sannadkiiba hal mar booqanayaa amase amar ku bixin karaa in la baaro xabsiyada dhammaantood isagoo la socodsiinaya wasiirka natiijada kasoo baxda booqashooyinka iyo baaritaannada noocaas ah.
3) Marka Wasiirku codsado xog ku saabsan xabsiyada, Taliyuhu wuxuu amar qoraal ah ku siinayaa Taliyaha xabsiga ama cid kale oo ma'suul uga ah soo gudbinta xogtaas, Taliyaha ciidankuna wuxuu warbixinta u gudbinayaa wasiirka.

### Qodobk 5aad

### Amarrada taliyaha ee gaarka ah

1) Taliyuhu wuxuu bixin karaa amarro gaar ah oo loogu tala galay saraakiisha, maxaabiista iyo maamulidda iyo ammaanka xabsiyada guud ahaan ama xabsi gaar ah.
2) Taliyuhu wuxuu bixinayaa amar la socodsiinayaa saraakiisha xabsiga, dadka soo booqanaya iyo maxaabiista.
3) Amarrada ee ku xusan qodobakan waxaa lala socodsiinayaa :
   a) Maxbuus kasta oo aan wax qorin waxna akhriyi karin.
   b) Maxbuus kasta oo aan Afsoomaaliga fahmayn.

### Qodobka 6aad

### Magacaabid

1) Taliyuhu wuxuu magacaabayaa taliyeyaasha xabsiyada kuwaas oo ka mas'uul ah nidaamka, maamulka iyo ammaanka xabsiga.
2) Marka Taliyaha Xabsigu maqan yahay waxaa xilkiisa qabanaya ku xigeenkiisa.

3) Marka taliyaha xabsiga iyo taliye ku xigeenkiisu maqan yihiin waxaa xilkaas qabanaya sarkaalka loo magacaabo.

## Qodobka 7-aad

## Taliyeyaasha Xabsiyada

1) Taliyaha xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay ilaalinta maxaabiista ku xiran xabsiga.
2) Taliyaha xabsigu wuxuu amarro ku soo saari karaa saraakiisha iyo maxaabiista amarradaas oo ku aadan Maamul-wanaagga iyo Ammaanka Xabsiga.
3) Taliyaha Xabsigu wuxuu isticmaali karaa awooddiisa si loogu hoggaansamo amarradiisa sharci ee la xiriira Maamul-wanaagga iyo ammaanka xabsiga.
4) Taliyaha xabsigu wuxuu soo gudbinayaa warbixin bille ah oo faahfaahinaysa howlaha xabsiga taas oo ay ka mid yihiin dhacdooyinka, booqashooyinka, dambiyada iyo tirada maxaabiista xabsiga ku jirta iyo wixii kale oo xog ah.

## Qodobka 8aad

## Hannaanka Xabsiga

1) Taliyaha xabsiga isaga oo ka amar qaadanaya Taliyaha Ciidanka wuxuu soo saari karaa nidaam xabsiyeed qoraal ah oo lagu sugayo maareynta iyo shaqo maalmeedka joogtada ah ee xabsigaas.
2) Taliyaha xabsigu wuxuu awood u leeyahay in uu qaado tallaabooyinka uu u arko in ay yihiin lagama maarmaan, isagoo dejinaya nidaam xabsi oo ay ku dhaqmayaan dhammaan saraakiisha xabsiga, saraakiisha kale, dadka soo booqanaya iyo maxaabiista.
3) Taliyaha Xabsigu wuxuu qaadayaa tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si nidaamka xabsiga loo dhowro isaga oo raacaya sida ku xusan qodobka 5aad xarafka (a iyo b) ee isla sharcigaan.

## Qodobka 9-aad

## Magacaabidda saraakiisha xabsiga

1) Taliyuhu wuxuu magacaabi karaa saraakiisha xabsiga tirada loo baahan yahay isaga oo raacaya sida sharcigu qabo.
2) Qof kasta oo loo magacaabo sarkaal xabsi wuxuu marayaa dhaarta ku xusan xeerka Ciidanka Asluubta.
3) Taliyuhu wuxuu ka qaadi karaa xilka sarkaal xabsi oo gudan waaya waajibaadkiisa shaqo isaga oo raacaya sida uu qabo Xeerka Ciidanka Asluubta.

## Qodobka 10-aad

## Awoodaha iyo waajibaadka saraakiisha xabsiga

1) Sarkaal kasta ee xabsi:
   a) Waxaa xil ka saaran yahay dhowridda ammaanka xabsiga uu ka shaqaynayo.
   b) Wuxuu qaadayaa mas'uuliyadda maxbuuska baxsada inta uu shaqada ku jiro xilkasnimo-xumi awgeed.
   c) Waa inuu fuliyo dhammaan amarrada sharciga waafaqsan ee taliyaha xabsigu uu siiyo iyo saraakiisha kale oo ka sarreysa.
   d) Wuxuu siin karaa maxbuuska amarrada ku habboon oo la xiriira ammaanka iyo maamulka xabsiga ee waaqfaqsan sharciga.

## Qodobka 11-aad

## Gacansiinta ay bixiyaan saraakiisha boolisku

Boolisku wuxuu gacan ka gaysan karaa marka ay duruufo gaar ah la soo gudboonaadaan xabsiga, haddii sidaas uu codsado Taliyaha Ciidanka ama Taliyaha xabsiga.

## Qodobka 12-aad

## Magacaabidda saraakiil aan ahayn saraakiisha xabsiga

1) Waxaa loo magacaabi karaa xabsiga saraakiil caafimaad, maamul, macallimiin iyo saraakiil kale kuwaas oo aan ahayn saraakiisha xabsiga oo ku xusan qodobka 9-aad ee isla sharcigan.
2) Taliyuhu wuxuu howlgelin karaa dad sidii shaqaale oo kale iyadoo la raacayo sharciga shaqaalaha rayidka ah.

# QEYBTA IV

# U-ADEEGIDDA, SOO GUDBINTA IYO SII DEYNTA MAXAABIISTA

## Qodobka 13-aad

## Daryeelka maxaabiista

1) Maxbuus kasta ee xabsi lagu xiray wuxuu hoos imaanayaa maamulka Taliyaha.

2) Dhammaan maxaabiista markii xabsi ka xabsi loo wadayo waxaa la adkaynayaa ilaalintooda. Waajibaadka ilaalinta noocaas ah waxaa lagu dhaqayaa amarro gaar ah.

## Qodobka 14-aad

## Qoraalka Xabsi ku haynta Maxbuuska

1) Maxbuus kasta waxaa xabsigu ku qaban karaa amar qoraal ah oo maxkamadeed.
2) Qoraalka xiritaanka ee Maxkamadda wuxuu la soconayaa maxbuuska marka loo gudbinayo xabsi kale.
3) Qoraalka xiritaanka maxbuuska waxaa lagu hagaajinayaa Taliyaha Xabsiga.

## Qodobka 15-aad

## Horgeyn Maxkamadeed

1) Maxkamaddu waxay Taliyaha xabsiga u diraysaa amar qoraal ah markasta oo ay rabto in maxbuus la horkeeno.
2) Maxbuus kasta oo maxkamad la hor-keenayo ama laga soo celinayo waxaa la sugayaa ilaalintiisa.
3) Sarkaal xabsi ama sarkaal boolis wuxuu Maxkamadda geyn karaa ama ka soo kaxayn karaa maxbuus isaga oo raacaya amarka Maxkamadda.

## Qodobka 16-aad

## Sii-deynta maxbuuska

1) Taliyaha xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay siideynta maxbuuska isaga oo fulinaya amarka maxkamadda.
2) Maxbuus ay daawo u socoto oo sarkaal caafimaad uu daaweynayo marka la doonayo in la siidaayo waxaa loo gudbinayaa isbitaal ama goob kale oo caafimaad halkaas oo daaweyntiisu uga sii socon karto.

3) Maalinta la amray in la siidaayo maxbuuska waxaa la siidaynayaa saacadaha shaqada, haddii maalintaasi ay ku soo aaddo jimce ama maalin fasax ah waxaa la siidaynayaa maalinta xigta inta lagu jiro saacadaha shaqada.

## Qodobka 17-aad

## Caawinaadda la siinayo maxaabiista la sii-daynayo

1) Taliyaha xabsigu wuxuu caawinaad u fidin karaa Maxbuuska aysan maskaxdiisu ama caafimaadka jirkiisu taam ahayn si uu u gaaro degaankiisii.
2) Maxbuuska waxaa laga siideyn karaa xabsi ku yaala degmo ka duwan tii laga soo xiray haddii uu sidaas doonayo suurta galna noqon karto.
3) Maxbuus laga soo daayey xabsi ku yaala degmo uusan caadiyan deganayn waa in degmadiisii lagu cesho iyada oo wixii qarash ahna Dowladu ay ka bixinayso.
4) Si looga hortago ku noqosho fal-dembiyeed maxbuus waqti badan xirnaa ee la siidaynayo ee aan mutaysan lacagta shaqo jirro awgeed, Taliyaha xabsigu isaga oo raacaya xeerarka degsan wuxuu siinayaa kharash.

## Qodobka 18-aad

## Dhimidda muddada xabsiga

1) Maxbuuska xabsi lagu xukumay haddii dhaqankiisu wanaagsanaado waxaa laga dhimmayaa muddada xabsiga uu ku xukuman yahay afar meelood oo meel (1/4).
2) Iyada oo la raacayo talada Taliyaha iyo codsiga Wasiirka, wuxuu Madaxweynuhu u fidin karaa maxbuus ama maxaabiis cafis ku salaysan shuruudo gaar ah sida xanuun halis ah.
3) Maxbuusku waa waayi karaa xabsi dhimidda loogu talo galay haddii Taliyaha xabsigu sidaas go'aansado sababtoo ah in maxbuusku dambi ku galay xabsiga gudihiisa ama inuu ka baaqsaday ka qayb-gelidda barnaamijyada dhaqan toosinta mana la siin karo xabsi dhimis la xiriirta muddo:
    a) Uu isbitaal galay isagoo adeegsanaya cillad isaga u gaar ah ama doonaya in muddadii xabsiga uu ku qaadan lahaa uu qeyb ka mid ah u gooyo;
    b) Edeg takoor loogu xiray ciqaab ahaan.
4) Taliyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu soo celiyo qayb ama dhammaan xabsi-dhimid horay loo diiday.

## Qodobka 19-aad

## Sii-dayn shuruudo ku xiran

1) Maxbuus ku xukuman 5 sano ama in ka badan marka uu ugu yaraan dhammaysto saddex meelood waqtigii uu ku xukunnaa, wuxuu xaq u yeelanayaa xabsi-dhimid u dhiganta afar meelood oo meel marka laga reebo maxbuuska galay dil iyo dambiyo lid ku ah dowladda.

2) Taliyuhu wuxuu go'aan ka gaarayaa shuruudaha xabsi-dhimidda isagoo raacaya tala bixinta Taliyaha xabsiga.
3) Shuruudaha xabsi-dhimidda waxaa ka mid ah:
   a) Isxaadirinta;
   b) Ka qayb-qaadashada hab nololeedka xabsiga;
   c) Shuruudaha shaqada;
   d) Ka qayb-gelidda barnaamijyada dhaqan-celinta;
   e) Ka dhowrsashada isticmaalidda daroogada, aalkolada iyo qaadka;
   f) Ka baaqsashada goobo mucayin ah iyo la xiriiridda dad gaar ah; iyo
   g) Ku xadgubka bandowga

## QEYBTA V

# MAAREYNTA, MAAMULIDDA IYO AMMAANKA

### Qodobka 20-aad

### Baaritaanka Maxaabiista

1) Maxbuus kasta marka xabsiga la keenayo waa la baarayaa sidoo kalena waa in la baaro mar kasta oo Taliyaha xabsigu ay la noqoto in ay lagama maarmaan tahay, ama sida Taliyuhu amar ku bixiyo ayada oo baaritaanka uu samaynayo qof ay isku jinsi yihiin maxbuuska, waana in laga qaado maxbuuska wax kasta:
   a) Oo aan si cad Taliyaha xabsigu ugu oggolaan;
   b) U muuqday inay halis ku yihiin ammaanka iyo hannaanka wacan ee xabsiga kaddib markii loo oggolaaday.
2) Ka-qaadista maxbuuska waxyaalaha ku xusan qodobkan faqraddiisa koowaad u keeni mayso Sarkaalka xabsiga wax dembi ah.
3) Waxyaalaha halista ah oo laga helo maxbuuska sida hubka oo kale waxaa loo gudbinayaa booliska ku shaqada leh.
4) Wax kasta oo aan waxyeelo lahayn oo laga helo maxbuuska waa loo celinayaa marka la siidaynayo.

### Qodobka 21-aad

### Xadayn

1) Taliyaha xabsigu wuxuu amnir karaa in maxbuus arrin laga horjoogsado marka ay u muuqato in ka horjoogsiga noocaas ah uu lagama maarmaan yahay:
   a) si looga hortago in maxbuusku naftiisa dhaawac u geysto ama qof kale uu dhaawaco;
   b) Si loo hor istaago in maxbuusku baxsado marka loo wado xabsiga ama laga soo wado ama marka uu si ku meel gaar ah uu xabsiga uga maqan yahay.

2) Horjoogsiga ku lug leh isticmaalka daawada waxaa la raacayaa tala-bixinta sarkaalka caafimaadka ama qof kale oo caafimaadka wax ka yaqaan.
3) Taliyaha xabsigu wuxuu u sheegayaa Taliyaha Ciidanka haddii hor-istaaggu ka bato 24 saacadood.
4) Waa inaan duruuf kasta oo jirta horjoogsi loo isticmaalin sidii ciqaab oo kale.
5) Horjoogsiyada keliya ee la adeegsan karo waa kuwa xeerarka waafaqsan.

## Qodobka 22-aad

## Meel gaar ah ku-hayn

1) Si loo dhowro xukun-wanaagga, nidaam-wanaagga ama ammaanka xabsiga, Taliyaha Xabsigu wuxuu amar qoraal ah ku bixin karaa in si gooni ah xabsiga gudihiisa loogu xiro maxbuus muddo aan ka badnayn bil.
2) Taliyaha Xabsigu wuxuu la socodsiinayaa Taliyaha Ciidanka amar kasta oo uu bixiyo.
3) Maxbuus kasta oo si gooni ah u xiran wuxuu helayaa hawo ku filan, qorrax iyo jimicsi muddo aan hal saac ka yarayn maalin kasta haddii uusan Taliyahu soo saarin amar sidaas ka duwan.

## Qodobka 23-aad

## Isticmaalka hubka

1. Taliyaha xabsiga ama Sarkaal xabsi waxay hub u isticmaali karaan maxbuuskii:
   a) Isku-daya inuu baxsado;
   b) Weeraraya ama isku dayaya inuu weeraro qof kale.
2. Taliyaha xabsiga, sarkaal xabsi ama qof kale oo loo xilsaaray waxay kaloo hub u isticmaali karaan:
   a) Qof fakinaya ama isku dayaya inuu fakiyo maxbuus.
   b) Qof si sharci darro ah u gelaya, jabinaya ama isku-dayaya inuu jabiyo xabsi.
3. Ka hor inta aan la adeegsan isticmaalka hubka ku xusan qodobkaan waa in looga digaa maxbuuska ama qofka kale fal-dembiyeedka haddii duruuftu saamaxayso.

## Qodobka 24-aad

## Ku xadgudubka ammaanka xabsiga

1) Haddii lagu xadgudbo nidaamka iyo ammaanka xabsiga, Taliyaha xabsigu wuxuu amar ku bixin karaa in la adeegsado awood si loo sugo nabadgalyada xabsiga.
2) Ka hor inta aan awood la adeegsan waxaa la bixinayaa digniin la xiriirta cawaaqib xumidda ka dhalan karta ka baaqsashada u hoggaansamid la'aanta nidaamka xabsiga.

## Qodobka 25-aad

## Booqashada xabsiga

1) Taliyaha xabsigu wuxu amar ku bixin karaa in la baaro:
   a) Qofka gelaya ama qofka jooga dibedda xabsiga haddii laga shakiyo.
   b) Baabuurka qofku la socdo iyo waxyaalaha uu sito.
2) Sidoo kale, waxaa la baarayaa carruurta la socota qofka iyo alaabtooda.
3) Haddii qofka soo booqday xabsiga diido in la baaro, wuxuu taliyaha xabsigu amar ku bixin karaa:
   a) In la baaro qofkaas.
   b) In la baaro wixii alaab ah oo uu sito, loo diido gelitaanka xabsiga iyo in laga saaro xabsiga haddii uu gudaha ku jiro.

4) Baaritaanka dumarka iyo carruurta ka yar 10 sano waxaa sameynaya:
   a) Sarkaal xabsi oo dumar ah ama qof kaloo dumar ah oo Taliyaha xabsigu amar ku siiyay baaritaankaas;
   b) Marka la baarayo carruurta waxaa baaraya dumar iyadoo uu la joogo qofka la socday, haddii uusan diidin
5) Waxyaalaha baaris awgeed looga reebay qofka soo booqanaya xabsiga ammaanka dartiis waa loo celin karaa booqashada kaddib.

6) Taliyaha xabsiga wuxuu weydiinayaa qofka soo booqanaya xabsiga:
   a) Magaciisa iyo cinwaankiisa oo buuxa iyo magaca iyo cinwaanka ilmaha la socda.
   b) Inuu qofkaasi sheego sababta booqashadiisa xabsiga.
7) Taliyaha Xabsigu wuxuu diidi karaa in la soo geliyo xabsiga:
   a) Qofkii diida inuu bixiyo xogta looga baahan yahay sida ku cad faqradda(6);
   b) Bixiya xog been ku salaysan.
8) Qofkii u hoggaansami waaya awaamirta ku xusan qodobkan amase bixiya xog been ah wuxuu galayaa dambi waxaana loo gudbinayaa saldhigga booliska.

## Qodobka 26-aad

## Booqashada xeer ilaaliyaha guud

Xeer Ilaaliyaha Guud, Ku-xigeennadiisa iyo wakiilladiisu waxay booqasho kormeer ah ku tegi karaan xabsiyada, iyagoo booqashadooda warbixin ka siinaya Taliyaha Ciidanka iyo Wasaaradda Caddaaladda.

## Qodobka 27-aad

### Ciqaab la xiriirta waxyaabo aan la oggolayn

1) Waxay noqon kartaa dembi; keenista iyo isku dayidda in la soo geliyo xabsiga waxyaabo xadgudub iyo caqabad ku noqon kara nidaamka, ammaanka iyo maamul-wanaagga xabsiga.
2) Qofkii oggolaansho la'aan keena ama ka saara xabsiga shay uusan lahayn amase bixiya macluumaad been ah wuxuu gelayaa dembi waxaana dacwaddiisa loo gudbinayaa booliska.

## Qodobka 28-aad

### Ciqaab-anshaxeed

1) Ciqaab anshaxeedka maxbuuska waxay noqon kartaa:

   a) Digniin;
   b) Canaan;
   c) Edeg takoor.
   d) Waayid xabsidhimid

## Qodobka 29-aad

### Diiwaanka anshaxmarinta

1) Diinwaanka anshaxmarinta waxaa lagu qorayaa magaca maxbuuxka, jinsiyadda, nooca gafka, ciqaabta anshaxmarinta iyo taariikhda waana la saxiixayaa.
2) Taliyaha Xabsigu wuxuu warbixin la xiriirta waxyaalaha ku qoran diiwaanka anshaxmarinta siinayaa Taliyaha bishiiba hal mar.

# QEYBTA VI

# BOOQASHOOYINKA

## Qodobka 30-aad

### Oggolaanshaha booqashada xabsiga

1) Taliyaha Xabsigu wuxuu oggolaan karaa inay booqdaan xabsiga waqtiyada shaqada xubno ka tirsan Hay'adda xuquuqul insaanka iyo xubnaha guddiga kormeeridda xabsiga, ka dib marka uu helo oggolaanshaha Taliyaha Ciidanka kuna qanco aqoonsigooda.

2) Kormeereyaasha gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee ku xusan qodobkan qaybtiisa koowaad waxay u kuur-galayaan xaaladda maxaabiista iyo xabsiga. Warbixinta u kuur-gelidda waxaa lagu qorayaa buugga booqashada ee xabsiga. Taliyaha xabsigu wuxuu warbixin bileedka ku darayaa warbixinta kormeeridda xabsiga.

## Qodobka 31-aad

## Magacaabidda iyo awoodda guddiga kormeerka xabsiga

1) Wasiirku wuxuu u magacaabayaa guddiga kormeerka xabsiga oo ah dad aqoon u leh hawshaas.
2) Awooda xubnaha Guddiga :
   a) Inay booqdaan xabsi kasta soona arkaan maxbuus kasta
   b) Inay su'aalo weydiiyaan saraakiisha xabsiga
   c) Inay baaraan tayada cuntada maxaabiista la siinayo
   d) Inay wasiirka ku wargeliyaan wixii cabasho khaas ah ee maxbuus uu qabo ee ay tahay in laga dhegaysto.
3) wuxuu baaritaan ku samaynayaa xabsiga ugu yaraan sannadkiiba hal mar kaddib markuu wargeliyo Taliyaha xabsiga, waana inuu diyaariyo warbixinno iyo talooyin isagoo u gudbinaya Wasiirka.
4) Wasiirku wuxuu guddiga amar ku siin karaa inuu sameeyo baaritaan aan la shaacin marka uu ogaado xaalado ka jira xabsiyo ama xabsi gaar ah.
5) Wasiirku wuxuu guddiga ku soo dari karaa khubaro ka socota Hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn.
6) Xubnaha Guddigu waxay awoodaan :
   a) In ay booqdaan xabsi kasta oo soo arkaan maxbuus kasta;
   b) In ay su'aalo weydiiyaan sarkaal kasta ee xabsi, sarkaal kale ama maxbuus iyo in ay helaan dukumiinti kasta, fayl ama warbixin;
   c) In ay baaraan oo tijaabiyaan tayada cunnada maxaabiista la siiyo;
   d) In ay Wasiirka ku wargeliyaan wixii cabasho khaas ah ee maxbuus uu qabo ee ay tahay in la dhagaysto.
7) Guddigu wuxuu tixgeliyaa tilmaamaha guddiga xuquuqul insaanka ee Qaramadda Midoobay kuna saabsan sida loola dhaqmayo maxaabiista.
8) Guddigu wuxuu u sheegayaa Taliyaha xabsiga natiijada baaritaanka Xabsiga.
9) Guddoomiyaha Guddigu wuxuu nuqul warbixinta baaritaanka ah siinayaa taliyaha, taliyuhuna wuxuu raacinayaa jawaabtiisa warbixintaas isaga oo u diraya wasiirka caddalaadda.

## Qodobka 32-aad

## Iskaashiga hawlwadeennada xabsiga iyo booqdeyaasha.

1) Sida ku cad qodobadda 30-aad iyo 31-aad Sarkaal Xabsi ama Sarkaal kale wuxuu caawinaad buuxda siinayaa cid kasta oo booqanaysa xabsiga.
2) Waxaa ka reebban Sarkaalka xabsiga, sargaal kale ama maxbuus is-hortaagga gudashada waajibaadka:
   a) Xubin ka tirsan Guddiga Kormeerka Xabsiga ama qof caawinaya isla guddigaas;
   b) Sheegidda been ama marin habaabin;
3) Is-hortaagga, beenta, marin-habaabinta ama hanjabaadda xubnaha ka tirsan guddiga ee ku xusan xarafka (a) iyo (b) ee isla qodobkaan, waxay keeni kartaa ciqaabta ku xusan qodobbada 255, 282, iyo 505 ee Sharciga Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 33-aad

## Baarista uu sameeyo taliyaha xabsiga

1) Maalin kasta oo uu joogo taliyaha xabsigu wuxuu booqanayaa meel kasta oo ka mid ah xabsiga oo maxbuus ku xiran yahay.
2) Taliyaha xabsigu wuxuu booqan karaa xabsiga saacado aan caadi ahayn oo habeenkii ah si uu u ogaado shaqada ay saraakiishu xabsiga ka hayaan iyo ammaanka xabsiga.
3) Saacadaha booqashada waqtiga aan caadi ahayn waxaa lagu qorayaa diiwaanka xabsiga.

# QEYBTA VII

# BOOQASHADA MAXAABIISTA

## Qodobka 34-aad

## Booqashada Qaraabada iyo saaxiibada maxbuuska

1) Maxbuuska xukuman waxaa loo oggolaanayaa booqashada eheladiisa, qareenkiisa, asxaabtiisa sida ku xusan qodobka 28.2 ee Dastuurka DPL .
2) Dadka soo booqanaya maxaabuuska rumaanka ah waxay codsi u qoranayaan Maxkamadda awoodda u leh kaddib marka ay helaan oggolaanshaha Xeer Ilaalinta Guud.

## Qodobka 35-aad

## Booqashada qareenka

Qareenku wuxuu booqan karaa maxbuuska wakiishay saacadaha caadiga ah ee shaqada iyadoo la ilaalinayo Maxbuuska lana dhagaysanayn hadalkooda.

## Qodobka 36-aad

## Booqashada booliska

Sarkaal booliska ka tirsan wuxuu booqan karaa maxbuuska baaritaan awgiis saacadaha shaqada, iyada oo Sarkaal xabsi kor ka ilaalinayo balse uusan codkooda dhegaysanayn.

## Qodobka 37-aad

## Diidmada booqashada

1) Haddii Taliyaha xabsiga ay ula muuqato in qofka booqashada ku yimid uu wax u dhimayo nidaamka iyo ammaanka xabsiga wuxuu u diidi karaa booqashada.
2) Taliyaha xabsigu wuxuu raacinayaa warbixinta billaha ah diidmada booqashada ku xusan faqrada koowaad ee qodobkan.
3) Taliyuhu wuxuu qof ka joojin karaa soo booqashada wakhti gaar ah waana ka noqon karaa markii ay meesha ka baxday sababtii diidmada keentay.

## Qodobka 38-aad

## Booqashooyinka iyo Xiriirada

1) Taliyaha xabsigu wuxuu tixgelin gaar ah siinayaa booqashooyinka ehelada iyo saaxiibada maxbuuska.
2) Maxbuus kasta waxaa soo booqan kara:
   a) Xubnaha qoyska iyo saaxiibadiisa;
   b) Qof caafimaadka wax ka yaqaan;
   c) Qof arrimaha sharciga wax ka yaqaan;
   d) Wakiilada qunsuliyadda haddii maxbuusku yahay ajnabi; iyo
   e) Wakiil heer caalami ah oo oggolaansho ka haysta Wasiirka iyo Taliyaha.
3) Xeerarka ayaa sheegaya qaabka booqashooyinka dadku ay xabsiyada ku imaanayaan, sida saacadaha booqashada, meesha la booqanayo, habka baaritaanka iyo wixii la mid ah.
4) Dhammaan qoraallada Maxaabiistu dirayaan ama helayaan waa la baarayaa si loo sugo ammaanka xabsiga.

## Qodobka 39-aad

### Helitaanka qareenka

1) Maxbuus kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo qareen kala taliya arrimaha sharciga.
2) Qareenku wuxuu booqan karaa maxbuuska wakiishay saacadaha shaqada.

# QEYBTA VIII

# DARYEELKA MAXAABIISTA

## Qodobka 40-aad

### Alaabta Maxaabiista

1) Dhammaan lacagta, dharka ama wixii kale ee maxbuus leeyahay ee aan loo oggoleyn inuu haysto waxaa xafidaya Taliyaha xabsiga kuna qoraya liis uu saxiixay maxbuusku. Hantidaas waxaa loo celinayaa maxbuuska marka xabsiga laga siidaayo ama dadka dhaxalkiisa leh hadduu dhinto.
2) Haddii maxbuusku codsado, Taliyaha xabsigu wuxuu oggolaan karaa in wixii hanti ah loo diro qaraabada maxbuuska ama saaxiibada maxbuuska waxaan ka ahayn dhar ku filan oo loo reebayo maxbuuska si uu u gashado marka la siideynayo.

## Qodobka 41-aad

### Raashinka

Maxbuus walba waxaa la siinayaa raashin ku filan marka loo eego garaamka raashinka ee lagu xusay xeerarka. Dhammaan raashinka maxbuuska looga keeno dibedda waa la baarayaa.

## Qodobka 42-aad

### Dharka

1) Maxbuus kasta oo xukuman waxaa la siinayaa dharka maxaabiista sida xeerarka ku cad. Dhar dheeraad ah ama dhar ka duwan kan xabsiga waa la siin karaa maxbuuska haddii sarkaal caafimaad uu sidaa ku taliyo ama Taliyaha xabsiga uu sidaa amar ku bixiyo sababo jira awgood.
2) Maxaabiista rumaanka ah waxay xirnaanayaan dharkooda caadiga ah haddii ay nadiif yihiin kuna habboon yihiin.

3) Haddii maxbuus rumaan ah uusan heli karin dhar ama dharka uu heli karo ay Taliyaha xabsiga ula muuqdaan dhar aan ku habboonayn, maxbuuskaas waxaa la siinayaa dharka xabsiga.
4) Haddii dharka maxbuuska ay jeexjeexan yihiin ama sababi karaan cudur la kala qaadi karo, Taliyaha xabsigu wuxuu amar ku bixinayaa in la baabi'iyo dharkaas. Marka la siidaynayo maxbuuska waxaa la siinayaa dhar uu ku qaadan karo bulshada dhexdeeda, dowladda ayaana bixinaysa qarashka ku baxaya haddii aan laga helin dharkaas qoyskiisa ama hay'ad samafal.

## Qodobka 43-aad

## Gogasha

1) Maxbuus kasta waxaa la siinayaa gogol ku habboon oo nadaafaddeedu dhorsantahay.
2) Gogol dheeraad ah ama mid taas ka beddelan waa la siin karaa haddii sarkaal caafimaad uu sidaas ku taliyo.

## Qodobka 44-aad

## Nadaafadda Maxbuuska

Maxaabiista waxaa laga doonayaa in ay is nadiifiyaan waana in ay helaan biyo iyo waxyaabaha kale ee musqusha lagu isticmaalo maadaama ay lagama maarmaan u yihiin caafimadka iyo nadaafadda.

## Qodobka 45-aad

## Jiifka

1) Maxbuus kasta wuxuu helayaa goob jiif oo leh:
   a) hawo, qalab nadaafadeed iyo wax kasta oo lagama maarmaan u ah caafimaadka maxbuuska;
   b) Asturnaan iyo dhaqan habboon;
2) Markii hoolal jiif la isticmaalayo, waxaa la wada dejinayaa maxaabiis dhowri karta dhaqanka wanaagsan ee dhexdooda ah. Si loo dhowro dhaqanka iyo xasilloonnida hoolkaas habeenkii waxaa la samaynayaa kormeer joogta ah.

## Qodobka 46-aad

## Codsiyada iyo cabashooyinka

1) Taliyuhu wuxuu xaqiijinayaa qaabka maxaabiistu codsiyada ku dhiiban karaan waana la diiwaangelinayaa cabashooyinka.
2) Maxbuusku wuxuu codsigiisa cabasho u gudbinayaa Taliyaha xabsiga kaasoo:
   a) Diiwaangelinaya dhammaan codsiyada iyo cabashooyinka iyo wixii tillaabooyin ah oo laga qaado;
   b) U sheegaya maxbuuska natiijada codsiyada iyo cabashooyinka;
   c) Haddii cabashadu ku saabsan tahay jirro, waxaa la xaqiijinayaa in maxbuuska lagu sameeyey baaritaan caafimaad, uuna helo daaweyn ku habboon, cabashadana loo gudbiyo xeer ilaalinta.
3) Haddii maxbuusku uusan ku qancin jawaabta laga bixiyo codsigiisa ama cabashadiisa maxbuusku wuxuu u gudbin karaa waxa uu tabanayo Taliyaha. Haddii maxbuusku ku qanci waayo jawaabta Taliyaha wuxuu u gudbin karaa waxa uu tabanaayo Wasiirka iyo/ama Guddiga Kormeeridda Xabsiga.

# QEYBTA IX

# WAXBARASHADA, DHAQANCELINTA IYO SHAQADA

## Qodobka 47-aad

## Waxbarashada maxaabiista

1) Taliyaha xabsigu wuxuu u diyaarinayaa maxaabiista fasal waxbarasho si kor loogu qaado aqoontooda loona baro xirfado.
2) Wasiirku wuxuu magacaabi karaa culumaa'uddiin barta maxaabiista diinta una qabata muxaadarooyin.
3) Taliyaha xabsigu wuxuu maxaabiista u qabanqaabin karaa xaflado, bandhigyo iyo wixii la mid ah.
4) Haddii ay suurtagal tahay xabsiga waa in laga helaa qalab isboorti sida kuwa jimicsiga, ciyaaraha iyo kuwa madadaallada.
5) Xabsigu wuxuu yeelan karaa maktabad ay maxaabiistu ka faa'iidaysan karaan buugaagta taal.

## Qodobka 48aad

## Barnaamijyada dhaqan-celinta

1) Sarkaalka madadaallada ee xabsigu wuxuu u diyaarin karaa maxaabiista adeegyada iyo barnaamijyada loogu talagalay dhaqan-celinta iyo fayoobidda.
2) Barnaamijyada iyo adeegyada dhaqan-celintu waxay ku salaysan yihiin in:
   a) Sare loo qaado caafimaadka iyo wacyi-gelinta maxaabiista;
   b) Maxaabiistu helaan aqoon iyo xirfad shaqo oo anfaca mustaqbalka;
   c) Maxaabiista laga caawiyo sidii ay u dhexgeli lahaayeen bulshada marka la sii daayo;
   d) Maxaabiista iyo qoysaskooda la siiyo adeegyo waano iyo cawinaad kale oo la xiriirta arrimaha iyo dhibaatooyinka shakhsiga u gaarka ah;
   e) La siiyo wacdi iyo waano la xiriirta dambiyadii uu maxbuusku horay u galay si uu uga shallaayo ugana toobad keeno.
3) Maxbuus xukuman waxaa loo diri karaa shaqo wuxuuna mutaysanayaa ciqaab asluubeed haddii uu fulin waayo amarka shaqada.
4) Maxbuuska waxaa lagu amri karaa in uu ka qaybgalo barnaamijyo wax looga qabanayo dabeecadiisa dembi-geliddu ku dheehan tahay.

## Qodobka 49-aad

## Ku-dhaqanka diinta

1) Iyada oo la dhowrayo ammaanka iyo nidaam-wanaagga xabsiga, maxbuusku:
   a) Wuxuu gudanayaa waajibaadkiisa diiniga ah;
   b) Waxaa wacdi u jeedin kara qof oggolaansho ka haysta Wasiirka.

## Qodobka 50-aad

## Shaqada maxaabiista

Dhammaan maxaabiista la xukumay waxaa laga doonayaa in ay u shaqeeyaan si ka jawaabaysa caafimaadkooda jirka iyo maskaxda kaddib marka sarkaal caafimaad uu arrintaa caddeeyo.

# QEYBTA X

# CAAWIMAADDA CAAFIMAADKA IYO DAAWEYNTA

## Qodobka 51-aad

## Daryeelka caafimaadka

1) Maxbuus kasta wuxuu heli karaa adeegyo daryeel caafimaad oo ku filan kuwaasoo ku salaysan mabaadiida daryeelka caafimaadka asaasiga ah.
2) Sida ugu macquulsan waa in loo sameeyo isbitaal ama meel kale oo loogu talo-galay daryeelka caafimaadka ee maxaabiista xanuunsan.
3) Xabsi kasta wuxuu yeelanayaa sarkaal caafimaad oo mas'uul ka noqonaya daryeelka caafimaadka maxaabbiista. Haddii kale sarkaalka caafimaadka ee isbitalka ugu dhow meesha xabsigu ku yaallo ayaa booqashooyin joogto ah ugu imaanaya maxaabiista, si loo sugo caafimaadkooda.

## Qodobka 52-aad

## Waajibaadka Saraakiisha caafimaadka

1) Sarkaalka caafimaadku wuxuu:
   a) Imaanayaa xabsiga waqtiga iyo mararka ku cad shuruudaha soo magacaabidda ama howl-gelinta;
   b) Baarayaa sida ugu dhaqsaha badan caafimaadka maxbuuska la keenay xabsiga marka uu ka codsado Taliyaha xabsigu;
   c) Xafidayaa qoraal ku saabsan xaaladda caafimaad iyo daawada loo qoray maxbuuska jirran;
   d) U gudbinayaa Taliyaha xabsiga warbixinnada iyo natiijada xaaladda caafimaad ee maxaabiista jirran;
   e) Kormeer caafimaad ku sameynayaa maxbuus si gaar ah u xiran haddii Taliyaha xabsigu codsado;

## Qodobka 53-aad

### Awoodda Baaritaanka Caafimaadka iyo Daaweynta

Waxaa loo adeegsanayaa awood sharciga waafaqsan haddii maxbuusku:

a) Diido in sargaal caafimaad uu baaro marka xabsiga la keeno;
b) Diido daaweyn lagama maarmaan ah;
c) Diido in la daaweeyo iyada oo Sarkaalka caafimaadku u arkayo in diidmadu khatar gelin karto nafta iyo caafimaadka maxbuuska, maxaabiista iyo dadka kale oo xiriir la yeelan kara maxbuuska.

## Qodobka 54- aad

## Maxaabiista bukta ama u baahan karantiin

1) Haddii maxbuus uu qabo cudur halis ah oo keenay karantiinka aan lagu dabooli karin xabsiga, Taliyaha xabsigu isagoo qaadanaya talada sarkaalka caafimaadka wuxuu amar ku bixin karaa in maxbuuska loo gudbiyo isbitaal dawladeed.
2) Haddii Sarkaalka caafimaadka ay la noqoto in maxbuusku uusan u baahnayn in halkaas lagu sii-hayo wuxuu ogeysiinayaa Taliyaha xabsiga si loogu celiyo xabsiga.
3) Taliyaha xabsiga waxaa xil-ka-saaran yahay ilaalinta maxbuuska lagu daaweynayo isbitaalka.

## Qodobka 55-aad

## Maxbuus maskaxdiisu aysan fayoobeyn

1) Markii sarkaal caafimaad caddeeyo in maxbuus aysan maskaxdiisu taam ahayn taliyaha xabsigu waa inuu sida ugu dhakhsaha badan uga saaro xabsiga uu ku xiran yahay loona gudbiyo isbitaalka qaabilsan cudurrada dhimirka.
2) Mar kasta oo maxbuus laga saarayo xabsiga si waafaqsan sharciga waxaa la ogeysiinayaa Taliyaha Ciidanka Asluubta.
3) Sarkaalka mas'uulka ka ah isbitaalka wuxuu ogeysiinayaa Taliyaha xabsiga mar kastoo isbitaalka laga saarayo maxbuus horey u qabey cudurka dhimirka si loogu celiyo xabsiga una dhammaysto muddada xariggiisa ka hartay. Haddii uu dhammaystay xariggiisii waa la siideynayaa iyada oo la raacayo sida sharcigu qabo. Muddada maxbuusku ku jiro isbitaalka waxaa loo xisaabayaa isaga oo ku jira xabsiga.

## Qodobka 56-aad

## Ogeysiinta hay'adaha sharciga

Taliyaha xabsigu wuxuu si aan daahid lahayn u ogaysiinayaa Hay'adaha caddaaladda maxaabiista sugaya in dacwad lagu qaado.

## Qodobka 57-aad

## Dhimashada maxbuuska

Marka maxbuus uu geeriyoodo, Taliyaha xabsigu wuxuu si aan daahid lahayn u wargelinayaa:

a) Sarkaalka caafimaadka oo caddayn doona sababta geerida keentay;
b) Hay'adda caddaaladda; iyo

c) Ehelada maxbuuska geeriyooday.

# QEYBTA X

# KALA-SAARIDDA

## Qodobka 58-aad

### Guddiga qaabilaadda iyo kala saaridda

1) Xabsi kasta wuxuu yeelanayaa guddi qaabilaad iyo kala-saarid oo ka kooban Taliyaha xabsiga iyo xubno kale oo Taliyuhu soo xulay. Guddigu wuxuu waraysanayaa go'aanna ka gaarayaa dabaqadda maxbuuska iyada oo la eegayo da'diisa iyo taariikh nololeedkiisii hore sidoo kalena go'aan ka gaaraya tababarradiisa iyo dhaqan-celintiisa.

2) Marka maxbuus xabsiga la keeno Guddiga Qaabilaadda iyo Kala-saariddu wuxuu:
   a) Diyaarinayaa qoraal ku saabsan:
      i. Aqoonsiga, da'da, lab iyo dheddig kan maxbuusku yahay;
      ii. Faahfaahin ku saabsan qoraalka ama amarka soo xiritaanka maxbuuska;
      iii. Dembiga maxbuuska loo haysto iyo heerka ay marayso dacwaddiisu;
      iv. Xog dheeraad ah oo ku saabsan aqoonsiga maxbuuska oo ay ku jiraan faraha, sawirrada, calaamadaha jirkiisa iyo cabirkiisa;
      v. Meesha qoyska maxbuusku ku sugan yahay, mujtamac ahaan meesha uu ka soo jeedo iyo dadka qaraabo ahaan u xiga oo ay tahay in la ogeysiiyo xaaladdiisa;
      vi. Faahfaahinta dhibaatooyin caafimaad oo la xiriiri kara maxbuuska;
   b) Ugu sheegayaa maxbuuska luuqad uu fahmi karo xuquuqdiisa iyo waajibaadka saaran.
   c) U diyaarinayaa maxbuuska baaritaan caafimaad isla marka xabsiga la keeno;
   d) U sheegayaa meesha maxbuusku ku sugan yahay qof qaraabo la ah, saaxiib ama qofka dhanka sharciga wakiilka uga ah ama wakiilka qunsuliyadda.

3) Taliyaha xabsigu wuxuu ka caawinayaa maxbuuska rafcaan qaadashada.

4) Guddiga Qaabilaadda iyo Kala-saariddu wuxuu la kulmayaa maxbuus walba ugu yaraan sanadkiiba hal mar si:
   a) Dib loogu eego dabaqadda maxbuuska;
   b) Go'aan uu uga gaaro hab-dhaqanka iyo horumarka maxbuuska;
   c) Talo looga siiyo maxbuuska habdhaqankiisa iyo horumarkiisa sannadka soo socda.

## Qodobka 59-aad

## Kala soocidda dabaqadaha kala duwan ee maxaabiista

1) Maxaabiista waxaa loo kala saarayaa sida soo socota:
   a) Maxaabiista la xukumay waxaa laga dhexsaarayaa kuwa rumaanka ah;
   b) Maxaabiista ragga ah waxaa laga soocayaa kuwa dumarka ah;
   c) Maxaabiista carruurta ah waxaa laga soocayaa kuwa qaangaarka ah waxaana la siinayaa wixii daryeel iyo daaweyn ah oo ay u baahan yiihiin;
   d) Maxaabiista maskaxda ka bukta waa in laga sooco maxaabiista kale;
   e) Maxaabiis sababo caafimaad dartood ay khasab tahay in laga sooco maxaabiista kale;
   f) Maxaabiis nidaamka wanaagsan iyo ammaanka xabsiga dartii ay tahay in maxaabiista kale laga sooco;
   g) Maxaabiista markii ugu horeysay dembi lagu helay dartii loo soo xiray waa in laga sooco kuwa caadaystay dembiga;
2) Saraakiisha xabsigu waa in aysan la kulmin maxaabiista aysan isku jinsiga ahayn waxaan ka ahayn markii uu joogo meesha sarkaal kale oo xabsi oo ay isku jinsi yihiin maxbuuska.

## Qodobka 60-aad

## Maxaabiista dumarka ah iyo carruurtooda

1) Maxbuusadda uurka leh marka ay umulayso waxaa la geynayaa isbitaalka, haddii ay suurtagal noqon waydo waxaa loogu yeerayaa umuliso ka caawisa dhalmada.
2) Canugga ku dhasha xabsi wuxuu xaq u leeyahay in hooyadii nuujiso oo daryeesho muddo labo sano ah.
3) Maamulka xabsigu wuxuu mas'uul ka yahay raashinka, dharka, daryeelka caafimaadka iyo adeegyada loogu talagalay in canuggu si fiican ugu koro inta uu xabsiga ku jiro isagoo la jira hooyadii.
4) Kaddib da'da labo sano jirka markii uu gaaro, cunugga waxaa lagu wareejinayaa qofka mas'uulka ka ah marka loo eego sharciga, haddii Taliyaha xabsigu uusan oggolaan in cunuggu sii joogo xabsiga sababo jira awgood oo ay ka mid yihiin:
   a) In sarkaal caafimaad uu go'aansado in sida ugu wanaagsan ee caafimaadka jirka iyo maskaxda cunugga ku jirto in uu la sii joogo hooyadii;
   b) In cunuggu uusan lahayn qaraabo u dhow oo hayn karta.

## Qodobka 61-aad

## Maxbuuska aan qaangaarka ahayn

1) Maxbuus kasta oo aan qaangaar ahayn:
   a) Wuxuu helayaa barnaamijyo waxbarasho oo la heer ah waxbarashada dugsiyada caadiga ah oo ay qaataan ardayda da'diisa ah;
   b) Wuxuu helayaa adeegyada shaqo ee bulsho, daryeel diineed, barnaamijyo madaddaalo iyo adeegyo dhanka maskaxda ah (psychological service);
   c) Waxaa loo oggolaanayaa in uu xiriir la yeesho qoysaskiisa iyada oo arrintaa loo sii marayo booqashooyin dheeraad ah.
2) Xeerarku waxay dhigayaan wixii kale oo loo baahan yahay si loo xaqiijiyo badbaadada iyo daryeelka Maxaabiista aan qaangaarka ahayn.

# QEYBTA XII
# MAXAABIISTA DILKA KU XUKUMAN

## Qodobka 62-aad

## Kormeeridda maxaabiista dilka ku xukuman

Maxbuuska dilka ku xukuman:
   a) Waxaa gooni looga xirayaa maxaabiista kale, waana in si joogto ah loo kormeeraa habeen iyo maalin;
   b) Waa inaan shaqo loo dirin;
   c) Waxaa loo oggolaanayaa hal saac oo jimicsi ah maalintii isaga oo ku jimicsanaya meel gooni ah;
   d) Waxaa loo oggolaanayaa adeegyo gaar ah oo lagala xiriirayo qaraabada, saaxiibada iyo sharci yaqaannada;
   e) Waxaa loo oggolanayaa in culumaa'udiin wacdida ay la kulmaan.

## Qodobka 63-aad

## La kulanka maxbuuska dilka ku xukuman

1) Maxbuuska dilka ku xukuman waxaa la kulmi kara Saraakiisha xabsiga, Saraakiil kale, sharci yaqaanno iyo qof kasta oo oggolaansho qoraal ah ka haysta Taliyaha Ciidanka Asluubta.
2) Booqashada maxbuuska dilka ku xukuman waxaa goob joog ka noqonaya labo Sarkaal xabsi, waxayna dhegaysanayaan wada hadalka maxbuuska iyo qofka soo booqday.
3) Kormeeridda iyo booqashada racfaanlaha dilka ku xukaman waxay la mid noqonaysaa midda maxbuuska xukunka dilka kama dambaysta ah ku dhacay.

# QEYBTA XIII

# AWOODDA LOO ISTICMAALI KARO MAXAABIISTA

## Qodobka 64-aad

## Adeegsiga awoodda

1) Sarkaalka xabsigu wuxuu adeegsan karaa awood si uu u sugo una ilaaliyo amniga xabsiga iyo maxaabiista isaga oo raacaya shuruucda xabsiga.
2) Isticmaalka awoodda waa in ay u dhigantaa heerka xaaladda markaas taagan.
3) Sarkaalka xabsigu wuxuu la socodsiinayaa Taliyaha xabsiga awoodda la adeegsanayo.
4) Taliyaha xabsigu wuxuu la socodsiinayaa, sida ugu dhakhsaha badan, Taliyaha Ciidanka adeegsiga hubka.
5) Taliyaha xabsigu wuxuu oggolaan karaa adeegsiga awood xaddidan oo ay ka mid noqon karto katiinadaynta maxaabiista si loo dhowro nidaamka iyo ammaanka xabsiga.

## Qodobka 65-aad

## Isticmaalka awood aan halis ahayn

Sarkaalka xabsiga waxaa loo oggolaan karaa adeegsiga hub aan halis ahayn sida usha booliska, sunta dadka ka ilmeysiisa ama eeyo tababaran.

## Qodobka 66-aad

## Isticmaalka hubka

1) Sarkaal xabsi wuxuu adeegsan karaa hub marka ay tahay sida keliya oo lagu xaqiijin karo nidaamka iyo ammaanka xabsiga waxaana loo isticmaali karaa hubka xaaladaha soo socda:
   a) Marka maxbuus uu baxsanayo ama uu isku dayayo inuu baxsado uuna diido inuu joogsado markii loo digo;
   b) Marka maxbuus uu isku dayayo inuu jabiyo qeyb xabsiga ka mid ah isla markaana uu sii wado jabinta markii loo digo;
   c) Marka maxbuus sameeyo buuq khakhal gelin kara xabsiga gudihiisa uuna diido inuu joojiyo;
   d) Markii maxbuus uu khatar gelinayo nafta ama dhaawac halis ah u geysan karo sargaal xabsi ama shakhsi kale;

e) Markii Taliyaha xabsigu oggolaado isticmaalidda hubka si loo horjoogsado in si khasab ah xabsiga lagu soo galo.

2) Sarkaalka xabsiga oo hub isticmaalaya:
   a) Waa inuu digniin cad ka bixiyo isticmaalka hubka haddii aan falka laga joogsan;
   b) Waa inuu waqti ku filan siiyo in digniinta wax lagu qaato;
   c) Waa inuu hubka u isticmaalo si qofka u geysan karta dhaawaca ugu fudud.

3) Sarkaal xabsi hub uma adeegsan karo maxaabiista haddii uusan amar ka haysan sarkaalka ka sarreeya oo ay goobta wada joog°an.

# QEYBTA XIV

# ANSHAXMARINTA MAXBUUSKA

## Qodobka 67-aad

## Tillaabooyinka anshaxmarinta

1) Taliyuhu markuu darso dacwadaha la xiriira dembiyada ciqaabaha anshaxmarinta wuxuu dejinayaa ciqaabaha lagu mutaysan karo dembiyadaas.
2) Anshaxmarinta maxbuuska waa in ay waafaqsan tahay sharciga.
3) Maxbuuska waa in si cad loogu sheego dembiyada anshaxmarinta oo lagu soo eedeeyey isla markaana fursad loo siiyo xaqa difaaca iyo ka cabashada go'aanka.
4) Maxbuusna laguma ciqaabi karo mar kale anshaxmarin horey loogu ciqaabay.
5) Taliyaha xabsigu wuxuu ku qorayaa diiwaanka dhammaan dacwadaha anshaxmarinta ee xabsiga.
6) Waxaa reebban oo mamnuuc ah in maxaabiista loola dhaqmo sifo bani'aadannimada ka baxsan oo dullayn ah dhaawici kartana jir ahaan iyo maskax ahaanba.
7) Dhimitaanka raashinka, daawooyinka iyo joojinta booqashooyinka looma adeegsan karo ciqaabta anshaxmarinta.
8) Taliyaha xabsigu wuxuu xaqiijinayaa in xadgudub la xiriira ciqaabta anshaxmarinta uu ka dhacay xabsiga wuxuuna go'aan ka gaarayaa xadgudubkaas, si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 68-aad

## Wax ka qabashada dembiyada anshaxmarinta

1) Taliyaha xabsigu wuxuu amri karaa in maxbuus lagu soo oogay dembi anshaxmarin ah lagu xiro meel gaar ah.

2) Maxbuus kasta oo lagu soo eedeeyay dembi anshaxmarin wuxuu xaq u leeyahay inuu is difaaco si waafaqsan sharciga.
3) Taliyaha xabsigu waa inuu sida ugu dhakhasaha badan u dhagaysto dacwad kasta oo lid ku ah maxbuuska.

## Qodobka 69-aad

## Ka cabashada go'aanka anshaxmarinta

Dacwadaha anshaxmarinta waxaa cabasho looga qaadan karaa Taliyaha oo ka gaaraya go'aan kama dambays ah.

## Qodobka 70-aad

## Fal-dembiyeedka

Taliyaha xabsigu wuxuu maxbuus kasta oo gala dembi culus u gudbinayaa booliska si loo baaro loogana gun gaaro.

### Qodobka 71-aad

### Dammaanad-qaadka sharci ee saraakiisha xabsiga

Adeegsiga awoodda ee Sarkaal xabsi ama Sarkaal kale keeni mayso in lagu oogo dacwad ciqaab ama madani ah marka uu gudanayo waajibaadkiisa sharciga ah.

## Qodobka 72-aad

## Raadinta maxbuuska baxsaday

Taliyuhu wuxuu dadweynaha u soo bandhigi karaa xogta iyo sawirka maxbuuska fakaday si ay uga digtoonaadaan khatartiisa loona soo qabto.

## Qodobka 73-aad

## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanaya amase aan la socon karin Xeerkan

## Qodobka 74-aad

## Dhaqan-gal

Sharcigaanu wuxuu dhaqan-gal noqonayaa ka dib markii lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**